Hordhac

Waa filim gaaban oo ku saabsan baadhitaanka naasaha. Adeega baadhitaanka naasaha waxa bixiya; Adeeg Bixiyaha Baadhista Naasaha ee Bariga iyo Badhtamaha London.

Zohra Ali, Kooxda Maamulka ee CELBSS

Magacaygu waa Zohra, waxan u shaqeeyaa adeeg bixyaha Baadhista Naasaha ee Bariga iyo Badhtamaha London, waxan halkan ka shaqaynayay mudo sanad iyo badh ah.

Hawshan qabano waxa ugu mihiimsan inaan manacno sawir qaldan oo dadku ka qabaan baadhista nasaaha, gaar ahaan arimaha ku saabsan ama sababta loo sameeyo Egasrayga (X-ray) naasaha laga qaado. Sidoo kale inaan wax ka qabano fahan daro dadka ka haysata xanuunka kansarka naasaha.

Dumarka badankiisu ma jecla inay ka hadlaan, laakiin sideedii dumar ahba, gabadh baa laga helaa kansarka naasaha mar ka mida noloshooda. Laakiinse maadaamoo imika hormar badan laga gaadhay tignoolajiyada loo adeegsado dawaynta kansarka naasaha iyo soo if-baxa dawooyinka casriyaga ah, tirada inta qofee ka badbaad xanuunkani way koradhay.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Sideedii dumar ahba, gabadh baa laga helaa kansarka naasaha mar ka mida noloshooda. Waaxda Daraasada Kansarka ee UK.

Shaqaalaha Soo dhawaynta

Fadlan yara fadhiiso, anagaa mar dhaw kuu yeedhi doonee.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Kiliiniga Baadhista Naasaha ee Cisbitaalka St Bartholowmew’s, ee magaalada.

Christine, isticmaale baadhista naasaha

Aad ayaad u mahadsantay.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Boqolkiiba sideetan (80%) dumarka uu ku dhaco kansarka naasuhu, da'doodu waa 50 iyo wixii ka wayn. Waaxda Daraasada Kansarka ee UK.

Dr Muncey, Lataliye Raadhiyoolagiis ah

Waxaan u yeedhnaa haweenka da'doodu tahay kontar jir iyo waxii ka wayn inay maraan baadhista naasaha sadexdii sanaba mar. Boqolkiiba sideetan (80%) dumarka uu ku dhaco kansarka naasuhu waa da'dan, markaa aad bay mihiim u tahay inay yimaadaan waxkhtiga loo fidiyay oo ay maraan baadhista naasaha.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Baadhista naasuhu waxay ka koobantay maritaanka egasrayga naasaha (sidoo kale loo yaqaano 'Mammogram') sadexdii sanaba hal mar.

Katrina, Raydhiyoolagiis

Christine Hodgson

Zohra Ali, Kooxda Maamulka ee CELBSS

Haween badani waxay aad u daneeyaan in ay maraan baadhistan si qarsoodi ah oo xushmayn leh. Inkastoo laga maarmaan ay tahay in la qaawiyo naasahooda muddo yaroo gaaban, waxan ugu balan qaadaynaa inaanu tix galino oo si qarsoon loogu fidiyo adeega baadhista naasaha. Taasoo ku qabsoomi doonta meel gaar ah, hawsha baadhistana qof dumara ayaa fulin doona.

Taladaanu siinaa waxa weeyay in dumarku soo xidhaan maryo saamaxaya inaan qofka dumari ah si dhamaystiran loo wada qaawin marka ay marayso egaysrayga. Taasoo fudaydinaysa, in la bixiyo kaliya shayga loo baahanyay si adeega loogu fuliyo.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Dhamaan shaqaalaha raydhiyogaraafarisku (radiographers) waa dumar.

Katrina, Raydhiyoolagiis

Magacaygu waa Katrina, waxan ka mid ahay shaqaalaha raydhiyogaraafariska ee cusbitaalka Barts.

Markan qof dumara geeyo qolka egasrayga waxaan u sharxaa habka adeega loogu fulinayo, dabadeedna waxan ka codsadaa inay bixiyaan maryahooga inta dhexda ka saraysa ilaa guudsare, oo uu ka mid yahay kayshaligu. Hawsha Mamagaraamku (Mammogram) waxay tahay egasray la mariyo naasaha afar jeer: oo ka kooban laba egasray oo naas walba la mariyo.

Naaska waxanu saarnaa meel loo yaqaan miiska baki (Bucky Table), isla markaana lagu cadaadiyo naaska mudo yaroo dhawr sekan ah. In yar oo diiqad ah ayaa hawshan ku jirta, laakiinse waa muddo yar oo aad u gaaban inta ay ku qabsoontaa.

Christine, isticmaale baadhista naasaha

Muddo yar ayay hawshani diiqad ku keentaa dadka, laakiin sawirka egasrayga ayaa si dagdag ah loo qaadaa, waxayna ku dhamaataa dhawr sekan. Dabadeedna sidoo kale, waxa sawirka egasrayga laga qaadaa dhinac kale oo naaska ah. Laakiin run ahaantii hawsha baadhista naasaha markad timaadid xarunta ilaa markad ka tagayso oo ay kuu dhamaanayso - waxay ka koobantahay muddo dhan shan iyo toban daqiiqo ilaa labaatan daqiiqo ah.

Dawn, isticmaale baadhista naasaha

Walaashay ayaa kansar ku dhacay manay ogayn in xanuunkani hayo, sababtoo ah may marin baadhis. Haddii ay mari lahayd baadhis, waxa laga yaaba in mar hora an ogaan lahayn xanuunkeeda , taasoo fudaydin lahayd wax ka qabadka ama daawaynta xanuunkan. Taas daraadeed, waxan go'aansaday inaan maro baadhis, wax badana way ii tartay. Waayoo waxan ka helay kalsooni naftayda ama caafimaadka naasahayga an ka qabo. Haddii xanuun la iga helo inta uu cusubyay, si dagdaga ayaan wax looga qaban karaa.

Dymphna, isticmaale baadhista naasaha

Way ii warantay, waanay I waydiisay in aan ogalay adeegan, haddii an u baahdo inaan joojiyana an joojin karo. Markaa waxaan dareemayay in taasi isiisay kalsooni badan, oo maamulkii adeegani gacantayda ku jiro.

Katrina, Raydhiyoogaraafar

Natiijadii baadhistan boosta ayaa laguugu soo ridi doonaa, waxaanad heli doontaa muddo sadex wiig gudaheeda ah, ma garatay?

Sawir kasoo baxay iskriinka

Waxaad ka heli doontaa natiijadaada boostaa, muddo laba wiig ilaa sadex wiiga gudaheeda ah.

Dr Purushothaman, Lataliye Raadhiyoolagiis ah

Waxan imika wadaa waxa weeyay is barbar dhig dadka an baadhay sawiradoodi maamogaraam ka (mammograms) ee cusub iyo sawiro hore oo laga qaaday saddex sano ka hor. Waxa ii muuqata inaan waxba is badalin, taasoo ah wax lagu farxo. Haddii aanu hayno sawiradii maamogaraamkee (mammograms) hore, waxay suurta galinaysaa in aanu aragno, wixii isbada yar ah ee u dhaxeeya is-barbardhiga, sawiradii hore iyo kuwa cusub. Is badal yar oo yimaada oo uu soo saaro sawirka ‘mammogram’ ga in aan qofku dareemin ugu yaraan muddo sanad ama laba sano ah. Wakhtigan hore ee la arki karo xanuunka cusub, wuxu si wayn u kordhinayaa heerka ka bad-baadka, taasina waxay tahay sababaha ugu mihiimsan ee an dumarka u marino baadhis sadexdii sanaba hal mar.

Sawir kasoo baxay iskriinka

Baadhista joogtada ahi waxay suurta galisaa in goor hore la arko xanuunka, iyo isla markaana wax ka qabadka ama daawaynta qofka. Borograamka Baadhista Kansarka Naasaha ee NHS.

Zohra Ali, Kooxda Maamulka ee CELBSS

Waxanu bixinaa tiro aad u badan adeega kiliinig oo habeenkii iyo wiikanka (weekend) ah. Waxaanu ku bixinaa goobo kala duwan. Waxan aad ugu dadaalnaa

inaanu yeelno kolba sida u fudud dadka, waxaanu tix galinaa baahidooda ama siday jecelyihiin.

Marka laguu sameeyo balan, hadaanad raali ka ahayn wakhtigaa, waad nala soo xidhiidhi kartaa, ama buukin cusub ayaad ka samaynsan kartaa qolka shabakada intarnadka (website).

Sawir kasoo baxay iskriinka

Si an kuugu fudaydino, waxanu bixinaa adeega kiliiniga habeenkii iyo wiikinka (weekend).

Sawir kasoo baxay iskriinka

Sidoo kale waxaanu baadhis ku bixiinaa goobe dhawr ah, taasoo ay ka mid tahay xarunta baadhista ee wareegta ah.

Sawir kasoo baxay iskriinka

20 kii dumara ee la baadho 19 waxba ayaa laga waayaa. Xarunta Macluumaadka ee NHS.

Dr Muncey, Lataliye Raadhiyoolagiis ah

Waanu ognay in dumarku ka war waraan marka loo soo diro warqada balanta ee baadhista naasaha. Laakiin labaatankii dumara ee la baadho sagaal iyo toban ayaa waxba laga waayaa, markay natiijadu soo baxdo. Xitaa kuwa baadhis kale lagu celiyo, sidoo kale intooda badan ama majooritiga, waxba waa laga waayaa natiijadooda – taasoo soo saarta in dhibaato wayni aanay jirin.

Dr Muncey, Lataliye Raadhiyoolagiis

Tirada yar ee kansar ah ee laga helo dumarka qaarkood, maaddamoo ay baadhista mareen, kansarka goor hore ayaa la ogaan karaa. Waaxanay suurto galinaysaa in si dhamaystiran loo daweeyo, ay yaraato xanuun qofkaa noloshiisa koobta.

Zohra Ali, Kooxda Maamulka ee CELBSS

Anoo arkay sida qoyskayga ay faa'iido ugu noqotay, baadhista kansarka naasaha ee la maro goor hore, waxaan mar walba ku dhiiri galiyaa hooyaday in ay balanta baadhista ee loo sameeyay ay oofiso ama marto baadhista. Markaa dumarka da'doodu tahay kontar jir ilaa todobaatan jir, fariinta an u gudbinayaa waxay tahay, inay ka fikiraan caafimaadkooda, ka fikiraan qoyskooda oo ay si joogta ah, xaadir noqdaan wakhtiga balanta loo fidiyay.

Gaba-gabo

Baadhista joogtada ahi, waxay badbaado u tahay nafta. Adeeg Bixiyaha Baadhista Naasaha ee Bariga iyo Badhtamaha London.